FSNAU Food Security and Nutrition Analysis Unit - Somalia

FEWS NET FAMINE EARLY WARNING SYSTEMS NETWORK

# SOMALIA Odoroska sugnaanta cunnada iyo nafaqada Dayrta 2013 dabadeed.

Bilaha 2aad ilaa 5aad, 2014


*Qiyaas ahaan 860,000 qof ayaa ku sugan xaalad Daran*

## Qodobada ugu Muhiimsan

- In lagu qiyaasay 857,000 qof ayaa ku sugan xaalad Daran ama Gurmad (Marxaladaha Wajiga IPC 3aad iyo 4aad) una baahan kaalmo gargaar oo degdeg ah inta u dhexeysa bilaha 2aad – 6aad, 2014.
- Tiro kale oo lagu qiyaasay in ka badan 2 malyuun oo qof ayaa xaaladooda sugnaanta cunnadu tahay mid nugul, laguna sifeeyay hadda inay ku jiraan xaalad walaac leh (Marxaladda Wajiga IPC 2aad). Qoysaskan/bulshadan waxa ku adkaan doonta inay helaan cunnada ay u baahan illaa badhtamaha sanandkan 2014; waxayna ahaan doonaan qaar u nugul dhibaatooyinka taas oo keeni karta inay xaaaladdu ka sii darto.
- Xaaladda sugnaanta cunnada ee qoysaska danyarta ah ee ku sugan deegaanada ay duufaannada ku dhufteen ee gobolada Waqooyi Bari, iyo deegaanada fataahaadu ku dhacdey ee gobolka Shabeelaha Dhexe oo hadda ku jira xaalad Ba'an (IPC Wajiga 3aad), oo ay ku sugan yihiin hay'ado gargaar. Hanti badan ayaa ku burburtay lumiyayna fursadihii suqyada, arrimahaas oo si weyn wax u yeeleeyay fursadda cunno helidda.
- Heerarka xaaladda nafaqo darida ayaa ah mid wali ku jirta xaalad Daran (oo lagu qeexay (GAM) kana sareysa 15 boqolkiiba) ee bulshada ku nool reer myiga ee qaybo badan oo ka mid ah gobolada Koonfurta iyo Badhtamaha Soomaaliya iyo inta badan Dadyawga ku Barakacay dalka gudihiisa. Qiyaas ahaan caruur dhan 203,000 cunug oo ka hooseeya shan sano ayaa hadda ku jira xaalad nafaqo darro. 51,000 oo ka mid ah caruurtan ayaa ku sugan xalaad nafaqo daro Ba'an, wajahayana xalaad dhimasho.

www.fews.net/somalia www.fsnau.org

**Khariiradda 1. Odoroska Sugnaanta Cunnada ee bisha 1aad, 2014**





Ilo wareed: FSNAU, FEWS NET iyo wehliyeyaasha Sawiray: (FSNAU) Hay'adda Falaqeynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada

Khariiradani waxay ka tarjumaysaa liidashada sugnaanta cunnada taas oo loogu talo galay kuwa go'aan-qaadasho ka qaadha xaaladaha gurmadka ah, inoomana shee-gayso xaalad aad u ba'an ee sugnaanta cunno. Fadlan guji halkan: www.fews.net/FoodInsecurity si aad u hesho xog dheeraad ah.

USAID FROM THE AMERICAN PEOPLE
EUROPEAN COMMISSION
UKaid from the British people
SWEDEN
MINISTRY FOR FOREIGN AFFAIRS OF FINLAND
Common Humanitarian Fund

## Taxane xilliyeedka sanad cadi ah




*Xaaladda Haatan Taagan*


*Deegaanada reer-miyiga*

Sugnaanta Cunnada iyo Nafaqada waxoogaa koboca ayay muujisay sababta oo ah: hagaaga wax-soo-saarka iyo qiimaha xoolaha, koboca helitaanka caanaha xoolaha iyo sii socoshada gargaarka iyo waliba korodhka wax-soo-saarka dalagyada dakhli dhalinta leh ee deegaanno badan ee dalka (Jaantuska 1). Fatahaaddii webiga ee ku dhufatay degmada Jowhar ee Shabeelaha Dhexe bilihii 9aad – 12aad, 2013, degmada Jamaame ee Jubada Hoose iyo meelo badan ee jiinka webiga ee Jubada Dhexe bishii 11aad, 2013. Bishii 11aad, duufaanno dhaliyay daadadka ayaa ku habsaday qaybo ka tirsan hab-nololeedka xoolo dhaqatada Deexda iyo Soolka ee gobolada Bari iyo Nugaal. Inta badan Dooxada Juba, qaybo ka tirsan Shabeelaha Hoose iyo degmada Beletweyn ee Hiiraan waxay heleen bilihii 10aad – 12aad 2013 ee xilligii Deyrta roobab ka hooseeyay intii caadiga ahayd, taas oo keentay wax-soo-saarka beeraha oo liita, keydka badarka oo yaraada. Tiiyo la xiganayo xogta dhawaan ay soo ururisay Hay'adda Falaqeynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada ee FAO iyo Hay'adda Hor-u-digida (FEWS NET) iyo la shaqeeyayaashooduba, gobolada wax yeelado soo gaadhay ee Shabeelaha Dhexe iyo Jubada Dhexe way ka sii dareen waxayna ku jiraan xalaad Daran (marxaladda wajiga IPC 3aad).

Roobabkii *Deyrta* ee bilihii 10aad – 12aad waxay ahaayeen kuwo ku kala duwan wadanka marka laga eego dhinaca mudado ay da'ayeen, dhulka ay ku da'een iyo mugaba/xadigaba:

- **Gobolada Waqooyi Bari**: Tayada roobku waxay ahaayeen mid dhexdhexaad ah ama ka wanaagsan si hufanna u gaadhay dhulka inta badan deegaanada hab-nololeedyada xoolo dhaqatada. Badhtamihii bishii 11aad, 2013, duufaanka loo yaqaan "Duufaanka Sadex" ayaa dhaliyay daadad qaybo ka tirsan hab-nololeedka xoolo dhaqatada Deexda iyo Soolka ee gobolada Bari iyo Nugaal, daadadkaas oo dhaliyay/sababay dhimasho dad iyo xooloba leh iyo burbur hantiyee sida qalabka kalluumeysiga, wadooyinka, ceelal iyo waxyaalo kale..

**Jaantuska 2. Odoroska muuqaalka Sugnaanta Cunnada ee bilaha 8aad – 12aad, 2013**




Ilwareed:: *FSNAU, FEWS NET Soomaaliya, iyo la Shaqeeyayaashooda. Sawirid: FSNAU*

Khariiradani waxay ka tarjumaysaa liidashada sugnaanta cunnada taas oo loogu talo galay kuwa go'aan-qaadasho ka qaadha xaaladaha gurmadka ah inoomana sheegayso xaalad aad u ba'an ee sugnaanta cunno. Fadlan guji halkan: www.fews.net/FoodInsecurity si aad u hesho xog dheeraad ah.

- **Gobolada Dhexe**: Roobku waa liitay, teelteelna wuu ku ahaa inta badan deegaanada hab-nololeedyada xoolo dhaqatada Hawd iyo Cadduun. Deegaanada caanka ku ah tacbashada digirta ee hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada Dhexe iyo hab-nololeedka Deexda ee gobolada dhexe ayaa helay roob dhexdhexaad ah.

- **Koonfur:** Inta badan hab-nololeedyada xoolo dhaqatada iyo beeraleydaba ayaa waxay heleen roobab wanaagsan oo baahsan. Hayeeshee, inta badan Jubooyinka iyo qaybo ka mid ah gobolada Gedo, Shabeelaha Hoose iyo Hiiraan ayaa helay roobab liita oo aan ku fileyn wax-soo-saarka beeraha.

Guud ahaan, wax-soo-saarka beeraha (masago iyo galley) ee xilliga *Deyrta* bilihii 12aad 2013 – 2aad, 2014 oo uu ku jiro wax-soo-saarka ka baxsan xilliga caadiga ah ee jiinka webiga (la filayo bisha 3aad 2014) ayaa lagu qiyaasay 87,800 tan (MT). Tani waxay 14 boqolkiiba ka yar tahay wax-soo-saarkii celceliska sanadihii 2002 – 2012 (15 sano) iyo 19 boqolkiiba celceliska shanta sano. Hoos-u-dhaca wax-soo-saarka waxa sabab u ah wax-soo-saarka aadka u liita ee Shabeelaha Dhexe, fatahaadda iyo colaadda awgeed, fatahaadda ka dhacday jiinka webiga iyo roob yaraanta ka jirtay hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada Jubooyinka iyo korodhka beeritaanka sisinta oo yareeyay beeritaan firileyda ee Shabeelaha Hoose, qiimaha sisinta oo fiican iyo firileyda oo hooseeya awgeed. Qiyaas ah 29,800 MT sisin ah iyo 10,800 MT digir ah ayaa xilligan la goostay. Inta badan wax-soo-saarka sisinta iyo digirta waxa laga goostay gobolada Shabeelaha Hoose iyo Baay. Dhinaca hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada gobolada W. Galbeed, wax-soo-saarka firileyda ee xilligii *Gu/Karanta* ee bilihii 11aad/12aad, 2013 ayaa lagu qiyaasay 44,000tan (MT), taas oo ah 62 boqolkiiba celceliska wax-soo-saarkii sanadihii 2010 – 2012 (3 sano). Kaydka badarka ee qoysaska dan yarta ah ee gobolada Shabeelooyinka iyo Baay waa mid ku dhaw inta caadiga ah. Hayeeshee, qoysaska ee deegaanada hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada ee degmada Beletweyn, Hiiraan, iyo gar ahaan deegaanada hab-nololeedyada beero-xoolo dhaqatada iyo jiinka webiga ee Jowhar (Shabeelaha Dhexe) waxay ku tiirsan yihiin wax ka iibsiga suuqyada iyo gargaarka.

**Xaaladda daaqa ee hab-nololeedyada xoolo dhaqatada dalka waa mid dhexdhexaad ah**, marka laga reebo goobo teelteel ah ee gobolka Sanaag, xoolo dhaqatada Cadduun, hab-nololeedka Deexda ee gobolada Dhexe iyo Jubooyinka, roobabka *Deyrta* oo liitay awgeed. Hayeeshee, xooluhu waxay daaqaan ama ka faa'iideystaan calafkii jiray labadii xilli roobaad ee la soo dhaafay iyo *jiilaalkii* horeba. Sidoo kale, guurguurka xooluhu waa mid caadi ah. Qaybo ka tirsan hab-nololeedyada xoolo dhaqatada Hawd, Cadduun iyo Deexda gobolada dhexe, qayb yar oo ka tirsan hab-nololeedka Sool ee gobolka Sanaag, Gedo, iyo Jubooyinka ayaa weel biyoodkii nus buuxsameen xilligii *Deyrta* sababta oo ah roobabka oo liitay. Waxa la filayaa bisha 2aad 2014 in biyo iibsigu bilawdo deegaanada roob yaraantu saameysay.

**Helitaanka daaqa iyo biyuhuba way hagaageen ama kobceen xilli roobaadkii *Deyrta* bilihii 10aad – 12aad iyo waliba xoolihii inta badan dalka**. Awood iibsiga oo lagu cabirey isweydaarsiga badeecadaha ee riyaha daabaxa ah iyo badarka ayaa ah mid farxad kalisay xoolo dhaqatada, taas oo ka sareysa heerka celceliska shanta sano. Qiimaha badarka (firileyda) waa ka sareeyaa qiimihii kal hore, iyo qiimaha riyaha daabaxa wax yare ayay ka hooseeyaan intii kala hore/sandkii hore. Hayeeshee, qiimaha riyaha daabaxa ah ayaa aad hoose ugu dhacay bishii 12aad, 2013 gobolada Baay iyo Bakool. Laakiin, guud ahaan qiimaha xoolaha ayaa si wanaagsan uga sareeya celceliska qiimahooda shanta sano. Tani waxa kale ee ay inna tusaysaa in wakhtigan oo kale sanadkii ay qiimuhu wax yar hoos uga dhaco inta caadiga deegaanno badan oo dalka ah. Hoos u dhaca awood isweydaarsiga badar (firida) iyo xoolaha ka sakow, qosasku waxay awood u leeyihiin inay helaan cunto iyaga oo isku bedelenaya riyaha iyo badarka (firileyda) oo uu ku jiro bariisku.

Inta badan noocyada/meesiyada xooluhu way rimeen ama irmaan yihiin inta badan hab-nololeedyada xoolo dhaqatada iyo beero-xoolo dhaqatada bilihii 10aad iyo 11aad, 2013. Xoolaha ay leeyihiin qosaska dan yarta ahi way kordheen intii u dhexesay bilaha 7aad – 12aad, 2013. Guud ahaan, tirada xoolaha lagu soo warbixiyay bishii 12aad, 2013 waxay u dhawdahay ama ka hooseysaa inta halbeeg/salka u ahayd xoolaha ee la diiwaan geliyay intii u dhexeysay sanadihii 2007 - 2011. Hayeeshee, tirada geelu way ka sareysaa tiradii halbeega/salka u ahayd geela hab-nololeedka geelayda ah ee Juba Hoose.

Bartamihii bishii 11aad, Dufaantii 3aad ee ka dhacda dhulalka kulaala dhul-baraha ayaa waxay ku habsatay xeebaha degmooyinka Eyl, Dangorayo (hore uga mid ahaan jirtay Qardho), iyo Bander-Beyla ee gobolka Bari iyo banka Sool ee degmada Dangorayo oo ka tirsan gobolka Nugaal. Tiro aad u badan oo xoolo ah ayaa u dhintay heerkulka jidhkooda oo hoos u dhacay ayadoo agab kalluumeysina ay khasaarooyin soo gaareen amaba ay lumeen xilligii duufaanta.

**Khidmadaha hawl-maalmeeyda** aan xasillooneyn ayaa ah ilo dakhliyeed muhiim u ah qoysaska saboolka si ay u helaan cunnooyinka suuqyada laga soo iibsado. Isweydaarsiga (TOT) u dhexeeya khidmadaha mihnad maalmeeyda aan xasilloonayn iyo firilayda ayaa ka sarreeya heerka celceliska shanta sano amaba ah kuwo u wanaagsan xoogsato maalmeelyada miyiga iyo magaalooyinkaba, in kastoo meelaha qaarkood uu ka jiray hoos u dhac tan iyo bishii 7aad ee 2013-ka.

Shan xilli oo isku xigta oo la helay roobab ku siman heerar dhexdhexaad iyo kuwo ka sarreeyaba tan iyo bilihii 10aad-12aad ee Deyrtii 2011 ilaa iyo Deyrtii 2013 ee dhamaatay bilihii 10aad ilaa 12aad ayaa waxay hore u mariyeen xaaladaha daaqa iyo biyaha ayna si aad ah u kordhiyeen heerarka qiime iyo kororka xoolaad ee Hab-nololeedka Daaqsatada Deexda. Taa waxa ka dhalatay in qoysaska saboolka iyo qeybo ka mid ah qoysaskii hore u ceyroobay ay si tartiib tartiib ahi u kordhiyaan tidara xoolohooda ayna dib ugu noqdaan noloshoodii xoolo-dhaqato. Sahan dhanka nafaqada ah oo la qabtay bishii 12aad kuna salaysnaa cabbirka dhexroorka


dhexda qeybta sare ee gacanta (MUAC) ayaa muujiyay xaalad nafaqo oo Daran ayadoo ay 7.8 boqolkiiba caruurta da'doodu ka yar tahay shanta sano loo aqoonsaday inay si ba'an u nafaqo-daran yihiin – taasoo lagu qeexay MUAC ka yar 12.5 senti-mitir (cm). Tani ayaa muujinaysa xaaladaha nafaqo oo xasilloonaa tan iyo bishii 7aad ee 2013 balse ka wanaagsan heerkii nafaqo-darrida Ba'an ee ee jiray bishii 12aad ee 2012. Hab-nololeedka Daaqsatada Deex-xeebeedka ayaa weli ku sugan Xiisad (Wejiga 3aad ee IPC) in kastoo cunno helidda qoysaska saboolka ahi ay waxoogaa yara hor martay.

Ayadoo loo aanaynayo soo-saarka dalagga ganacsi oo kordhay, soo-saarka iyo tirada xoolaha oo korodhay, qiimaha xoolaha oo wanaagsan iyo heerarka mihnad maalmeeka aan sugnayn oo yara wanaagsan, natiijooyinka sugnaanta cunno ee inta badan hab-nololeedyada miyiga ee dalka ayaa hore u martay tan iyo bishii 7aad 2013 in kastoo soo-saarka dalag ee Deyrta 2013/14 uu ka hooseeyey heerka celceliska (dhexdhexaad). Inta badan dhulka miyiga ee dalka ayaa haatan ku sugan heer Walaac (Wejiga 2aad ee IPC), balse waxa jira qoysas badan oo sabool ah oo weli ku sugan Xiisad (Wejiga 3aad ee IPC) iyo mid Gurmad (Wejiga 4aad ee IPC). Horumarka guud ee jiray tan iyo bishii 7aad ayaan waxaa ka baxsan hab-nololeedka Daaqsatada Deex-xeebeedka, dhulka webilayda Jubbada Dhexe, hab-nololeedka Beero-xoolo dhaqatada Koonfurta, dhulka wabilayda ee degmada Jowhar ee gobolka Shabeellada Dhexe, iyo dhulalka ay aafeeyeen duufaanta ee gobollada Nugaal iyo Bari ee Waqooyiga Bari. Dhulalkan ayaa weli ku sugan Xiisado (Wejiga 3aad ee IPC).

*Magaalooyinka*

Intii u dhaxaysay bilihiii 7aad iyo 12aad ee 2013, natiijooynka sugnaanta cunnada ee magaalooyinka ayaa xoogaa hore u martay, taasoo la mid ah isbaddalada lagu arkay dhulka miyiga. Walow soo saarka dalag ee Deyrta 2013/14 oo ahayd mid ka hoosaysay heerarka caadiga ah, ayaa haddana sicirka massagada iyo gallayda ay ahaayeen kuwo hooseeya marka loo eego sare u kicii sanadihii hore ayagoo haddana sicirkoodu uu degganaa bishii 12aad. Qiimaha caalamiga oo xasilloonaa ama hoos u dhacayay ayaa weli saamayn ku leh suuqyada magaalooyinka gaar ahaan bariiska, burka ama daqiiqda, sonkorta iyo naaftada.

**Jaantuska 3. Isk-beddelashada Mushqaayad Maalmeedka ito Firida ee**




Sarrifka shilinka Soomaaliga (SOS) iyo kan Soomaalilaan (SlSH) ee Dollarka Maraykanka ee sannadda 2013 ayaa weli ahaa mid ka sarreeya sannaddii 2012. Tani ayaa u dhow inay sabab u tahay dhaqaalaha oo kobcaya, xasillooni, iyo soo gelidda shilinka Soomaliga (SOS) oo xaddidan.

Tilmaamaha sicirka macmiilka (CPI) ee Soomaalia ayaa waxa lagu cabbiraa isbaddalka qiimaha nolosha ugu yar (MEB). Bilihii 11aad/12aad ayaa CPI-gu wax yar sare u kacay, loona aaneynayo inta badan kororkii qiimaha badarka ee soo go'ay xilligii ugu dambeeyey, laankiinse waa uu degganaa tan iyo bishii 12aad ee sannadda 2012.

Intii u dhaxaysay bilihii 7aad iyo 12aad ee 2013, qiimaha nolol-maalmeed ee ugu yar (CMB) ee gobollada waqooyiga iyo bartamaha ayaa xasilloonaa, waxaana sidaa ka duwan gobollada Mudug iyo Waqooyi Galbeed halkaasoo qiimaha uu kordhay 13 iyo 11 boqolkiiba, siday u kala horreeyaan. Dhanka Koonfureed, CMB-ga ayaa kordhay 9 ilaa 24 boqolkiiba, laakiinse qiimaha gobollada Banaadir (Muqdisho) iyo Hiiraan ayaanan is sidiisii hore iska beddelin. Marka la eego Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, hawlaha ka socda dekadda Muqdisho, qiimaha alaabada la soo dejiyo oo hoos u dhacaysa, qiimaha firilayda dalka laga soo saaro oo ka hooseeya heerka celceliska ayaa la micno ah in CMB-ga amaba qiimaha nolol uu in yar oo keliya sare u kacay tan iyo bishii 7aad ayadoo goobo kalena qiyaas ahaan nolol-maalmeedku uu xasilloon yahay.


Halka CMB-gu uu muujiyo sida uu nolol-maalmeedku yahay guud ahaan, awoodda wax-iibsiga dhabta ah ee saboolka magaalooyinka ayaa waxa loo dhawaynayaa in lagu ogaan karo isweydaarsiga badeecadda (ToT) ee u dhexeeya khidmadaha hawl-maalmeedyada aan sugnayn iyo firilayda. Inta badan gobollada ayaa intii u dhaxaysay bilihii 7aad – 12aad ee 2013, ToT-ga u dhexeeya khidmadaha hawl-maalmeedyada aan sugnayn iyo firilayda dalka laga soo saaro uu hoos u dhacay (eeg Jaantuska 3aad). Inta badan gobollada Koonfurtana, Isku beddelashada mushqaayadda iyo firida

*Goobaha ay ku Nool Yihiin Dadka Dalka Gudihiisa ku Bara Kacay*


Intii u dhaxaysay bilihii 7aad iyo 12aad ee 2013, FSNAU iyo bahwadaag kale ayaa waxa ay ka qabteen sahamo dhanka nafaqada iyo sugnaanta cunnada la xiriirta saddex iyo toban goobood oo ka mid ah goobaha ugu waaweeyn ee ay deggan yihiin barakacayaasha.

Boqolkiiba 13 oo barakacayaasha ka mid ah ayaa soo galay goobahaasi sanaddii hore dhexdeeda. Dhoobley, Muqdisho, iyo Baydhaba ayaa waxa magan u ah tirada ugu badan ee barakacayaasha ee dhowaanta barakacay, waana 33, 28, iyo 24 boqolkiiba siday isugu xigaan. Xaaladda sugnaanta cunno ee inta badan goobaha barakacayaasha ayaa hore u yara martay, ayna ugu wacan yihiin iswaydaarsiga badeeco (ToT) ee u dhaxeeya khidmadaha hawl-maalmeed iyo firilayda oo hore u martay, soo gelidda badeecadaha gudaha iyo dibadda oo heer caadi ah, iyo helidda gargaarka bani'aadminimo. Tiro ballaaran oo qoysaska barakacayaasha ka mid ah ayaa fursad u helay inay cunnaan afar iyo in ka badan oo noocyada cunnada ah, taasoo tilmaan u ah in helidda cunnada ay hore u martay marka la barbar dhigo daraasado dhowaan la sameeyey. Hase yeeshee, qeyb ballaaran oo barakacayaasha ka mid ah oo ku nool Doolow iyo Kismaayo ayaa helay oo keliya cunno ka yar afar nooc. Inta badan qoysaska barakacayaasha ayaa waxay leeyihiin hal ilo dakhli oo keliya, waana shaqooyin maalmeed aan sugnayn, laakiinse, ilaha dakhli ee barakacayaasha Baydhaba, Kismaayo, Hargeysa iyo Burco ayaa inta badan ah laba ilaa saddex ilood. Ku dhowaad 60 boqolkiiba qoysaska barakacayaasha ayaa leh dhawr hantiyood. Ilaha dhaqaalaha ee barakacayaasha ayaa aad u yar, aadna wey u deymeysan yihiin. Barakacayaasha intooda badan wey helaan biyo. Balse Kismayo, Dolow iyo Boosaaso, inta u dhexeysa 11 illa 36 boqolkiiba qoysaska waxey hilaan biyo saafiya. In la qiyaasey 635,000 barkacayaal oo dalka oo dhami ah ayaa haatan ku sugan xaalad *Ba'naan* ama *Gurmad deg-deg* ah (IPC Wajiyada 3 ama 4).

**Jaantuska 4: Kharashka ku baxa cunnada iyo waxyaabaha aan cunnada ahayn bisha 12aad**




**Jaantuska 5: Boqolkiiba qoysaska barakacayaasha isticmaala ilooyin dakhli oo dhowr ah**





## *Xaaladaha Nafaqo*

Ayadoo lagu salaynayo natiijooyinkii sahamadii ay qabteen Hay'adda Sugnaanta Cunnada iyo Nafaqada (FSNAU) iyo bahwadaagta kale bishii 11aad 2013 ilaa bishii 1aad 2014, xaaladaha nafaqo ee inta badan dalka ayaan haba yaraatee is baddalin (eeg Jaantuska 6). Hase yeeshee, baahsanaanta Nafaqodarrida Guud ee Ba'an (NGB) ee barakacayaasha Qardho iyo Berbera ayaa korodhay. Celceliska NGB-ga ayaa ahaa 14.2 boqolkiiba taasoo muujinaysa xaalad nafaqo oo yara xasilloon marka loo eego siday ahayd, 14.4 boqolkiiba, bishii 7aad. Xaaladaha nafaqo ee sii xumaaday ee barakacayaasha Qardho ayaa waxay u muuqatay inay sababeen koror dhanka faafka cudurrada ah. Boqolkiiba 46 qoysaska barakacayaasha ayaa sheegay faaf cudur marka la barbar dhigo bishii 7aad ee 2013 tirada ayaa ahayd 22 boqolkiiba. Kororka baahsanaanta NGB-ga ee lagu arkay Berbera bishii 1aad ee 2014 ayaa ka tarjumaya isbeddellada xilliyeed iyo weliba suurogalnimada quudinta ubadka aadka u yar yar iyo caruurta kale oo liidata taasoo lagu arkay cunno kala-beddelnaanta liidata ee caruurta. Marka la barbar dhigo bishii 12aad ee 2012, baahsanaanta NGB-ga ee inta badan hab-nololeedyada ayaan isbaddalin, in kastoo NGB-ga barakacayaasha Garoowe uu yara kordhay. NBG-yo heerarkoodu gaarayo kuwo Ba'an ayaa waxa uu ka dhex jiray caruurta barakacayaasha kaasoo gaaray 16 boqolkiiba koonfurta Soomaaliya marka la bar bar dhigo 15 boqolkiiba gobollada kale ee Soomaaliya.

**Nafaqodarrida Aadka u Ba'an (NAB):** Baahsanaanta NAB ayaa aad ugu sarreeyey goobaha uu NBG-goodu sarreeyey, waxana jiray xiriir toos ah oo wax-ku-ool ah oo ka dhexeeya NBG and NAB heerkiisu yahay 0.73. Heerar aad u Ba'an oo NAB-ka ah, laguna qeexay in ka badan 4.5 boqolkiiba ayaa lagu arkay barakacayaasha Doolow, Qardho iyo beero-xoolo dhaqatada Baay. Heerar daran oo NAB-ka, laguna qeexay inta u dhaxaysa 3.5 iyo 4.4 boqolkiiba, ayaa lagu arkay barakacayaasha Dhoobley, Berbera, iyo Garoowe iyo degmada Beledweyne ee Hiiraan. Marka la barbar dhigo bishii 7aad ee 2013, baahsanaanta NAB-ka ee barakacayaasha Doolow iyo Qardho ayaa kordhay.

**Qudh-bixidda iyo baahsanaanta cudurrada:** NBG-ga iyo NAB-ga jira ayaanan muujin xiriir wax-ku-ool ah oo ka dhexeeya qudh-baxa iyo baahsanaanta cudurada. Baahsanaanta cudurrada ee caruurta ka yar shanta sano ee inta badan gobollada ayaa ahayd heer la aqbali karo. Degmada Beledweyne ayaa waxa ka jiray heerar Daran, kuwaasoo lagu qeexay qudh-bax caruurta ka yar shanta sano ee heerkoodu u dhexeeyo 2.0 ilaa 3.9 boqolkiiba. Baahsanaan cudur ka badan 50 boqolkiiba ayaa laga diiwaan geliyay Beledweyne, Matabaan iyo Barakacayaasha Doolow.

**Jaantuska 6: Qiyaasta xaaladda nafaqada bisha 1aad 2014 kuna salaysan sahamadii nafaqo ee bishii 12aad ee 2013**




**Nafaqodarrida Muddada Dheer:** Celceliska korid-laan caruureed ayaa ahaa 14 boqolkiiba, tilmaamayana in korid-laan caruureeddu aysan ahayn dhibaato aad u weyn oo la xiriirta caafimaadka bulshada ee Soomaaliya. Hase yeeshee, heerar korid-laaneed sarreeya oo goos goos ah, laguna qeexay in ka badan 30 boqolkiiba, ayaa lagu arkay dhulka beero-xoolo dhaqatada gobolka Bay, degmada Beledweyne iyo Barakacayaasha Baydhaba, Kismaayo, iyo Qardho. Waxa la helay xiriir toos ah cabbirkiisu yahay 0.33 oo ka dhexeeya faafka NBG-ga iyo korid-la'aanta caruur iyo mid cabbirkiisu yahay 0.45 oo u dhexeeya NAB-ka iyo korid-laanta caruureed. Arrimahani ayaa tusaya in nafaqodarrida a'an ay ku dhacdo caruurta ay hore nafaqodarridu in muddo ahi u haysay.

**Miisaan-yarida:** Heerar miisaan-yari aad u sarreya, laguna qeexay in ka badan 30 boqolkiiba, ayaa laga helay koonfurta Soomaaliya, gaar ahaan beero-xoolo dhaqatada Baay, degamada Beledweyne ee Hiiraan iyo barakacayaasha Kismaayo. Heerar sarreeya, oo lagu tilmaamay in ka badan 20 boqolkiiba, balse ka yar 30 boqolkiiba ayaa ka dhex jiray caruurta barakacayaasha Baydhaba, Doolow, Boosaaso, Qardho, Garoowe, iyo Gaalkacyo. Sahanka ayaa waxa uu tusay xiriir aad u xoog badan cabbirkiisu gaarayo 0.89 oo ka dhexeeya baahsanaanta korid-laanta caruureed iyo miisaan-yarida caruurta la sahmiyay.

**Tirada Haatan Gacanta lagu Hayo:** Tiro lagu qiyaasay 203,000 oo caruur ah oo da'doodu u dhaxayso lix ilaa 59 bilood oo ku nool Soomaaliya ayaa haatan waxa ay la daalaa-dhacayaan nafaqo darri ba'an , waxana ka mid ah 51,000 oo caruur ah kuwaasoo si aad iyo aad u ba'an u nafaqo darraysan. Qiyaasta tirada guud ee xaaladaha NAB ayaa ah mid 25 boqolkiiba ka sarreeysa tiradii bishii 7aad 2013 amaba 12.5 boqolkiiba ka sarraysa tiradii bishii 12aad ee 2012. Arrimahani ayaa tusaya in heerarka NAB ay si aad ahi ugu kordheen Soomaaliya.

*Malamaleyn*

Saadaasha Bilaha 2aad illaa 6aad 2014 ayaa lagu saleeyay malamalahan soo socda:

**Cimilada:**

**Heerkulka dhulka dushiisa oo si aan caadi ahayn u sarreeya**, illaa ku dhawaad 2 darajo in ka sarreeysa caadiga, ayaa loo badinayaa **illaa Bisha 3aad** inuu ahaado heerkulka koonfurta Soomaaliya.

- **Roobabka Guga ee Bilaha 4aad illaa 6aad 2014** ayaa la filayaa in ay wadarta roobabka noqdaan kuwo ka hooseeya caadiga ama ku dhow caadiga.

**Dalabka hawsha beeraha iyo waxsoosaarka dalagga:**

- **Waxsoosaarka firida ee *Deeyrta*** ee Bilaha 1aad iyo 2aad ee ka hooseeyay caadiga, cadadka firida ee laga helayo suuqyada iyo qoysaska ayaa iyana ka hooseeya caadiga. Sicirka firirda ayaa loobadinayaa in ay jawaabtu noqoto in ay si dhexdhexaad ah u kacaan, gaar ahaan meelihii uu waxsoosaarkoodu uu si wax ku ool ah u hooseeyay.
- **Waxsoosaarka dalagga iibka ee *Deyrta*** ee Bisha 2aad ayaa loo badinayaa inay noqdaan kuwo mug ahaan ka sarreeya caadiga gobollada koonfurta Soomaaliya. Waxsoosaarkan kordhay ayaa loo badinayaa inay ka dhalato koror dakhliga lacageed ee qooysaska dhexdhexaadka iyo kuwa tujaarta ah.
- Roobabka Bilaha 4aad illaa 6aad ee *Guga* ood mooddo in la filayo inay noqdaan kuwo dhexdhexaad ku dhow, dhulka lagu beeri doono dalagga ayaa loo filayaa inay intii caadiga noqdaan. Dhul diyaarinta ayaa billaban doonta xilligii caadiga ahaa. Dalabka hawsha beeraha, abuuridda iyo falidda ayaa loo badinayaa inay caadi noqoto laga billaabo Bisha 3aad illaa Bisha 6aad.

**Xoolaha:**

- **Xaaladda dhaqnaanshaha xoolaha** ayaa loo badinayaa inay caadi sii ahaadaan xilliga Jiilaalka ee Bilaha 1aad – 3aad iyadoo loo filayo in daaq ingagay oo sii jiri doono. Balse, helidda daaqa iyo biyaha ayaa sida xilliga u caadada ahayd u sii yaraan doona, waxaana sidaa ka dhalan doona **guurguur xoolaad oo** sidii u caadada ahay inay u guuraan meelihii ay daaqi jireen xilliga diraacda ee illaa Bisha 3aad.
- Helidda biyaha iyo daaqa ayaa loo badinayaa inay yaraadaan xilliga Jiilaalka deegaannada intooda badan, gaarahaan meelo ka mid ah xoolo-dhaqatada Hawdka iyo Cadduunka, Beer-xoolodhaqatada koonfureed ee Jubbada Dhexe, iyo Beer-xoolodhaqatada Hiiraan maadaama deegaannadaas ay heleen roobab ka yar Bilihii 10aad illaa 12aad isla markiina ay billaabeen xilligii diraacda oo roob la'aan ah.
- **Helidda caanaha** ayaa sidii caadiga ahayd, oo xilliyeedka ahaa uu hoos u dhici doonaa inta u dhaxeysa Bisha 1aad ilaa 3aad ee xilliga jiilaalka maadaama tirade xoolaha la maalo ay hoos u dhaceyso.
- Waxaa la filayaa in Koonfurta iyo Waqooyiga dalka ay helaan **dhalmo xoolaad** oo dhexdhexaad ah marka roobabka Guga billaabmaan inta u dhexeysa dabayaaqada Bisha 3aad iyo horraanta Bisha 4aad. Dhalmada riyaha oo dhexdhexaad ah iyo ta geela oo hooseysa ayaa loo filayaa gobollada Dhexe.
- Waqooyiga, laga billaabo Bisha 6aad, waxey u badan tahay in **xoolaha qooysaska** ay kordhaan. Gobollada Dhexe, dhammaan xoolaha waxaa loo filaaa in tiro ahaan ay kordhaan. Dhanka Koonfurta, inkastoo la filayo in tirade xoolaha ay kordhaan illaa Bisha In the central regions, all species are expected to have growth in number. In the South, while herd sizes are expected to continue to grow through June, total herd sizes are expected to remain well below historical sizes, except in Southern Inland Pastoral (SIP) livelihood zone in Lower and Middle Juba Regions where herd sizes are expected to remain near or slightly above their historical size.

**Sicirka caanaha** ayaa raaci doona isbeddel xilliyeedka oo kordhi doona Bilaha 1aad illaa 3aad ee xilliga Jiilaalka dhicina doona marka xooluhu dhaan bartamaha Bisha 4aad illaa 6aad ee roobabka Guga. Habnololeedyada diil-webi, wuxuu raaci doonaa sidii caadiga aheyd ee xilliyeedka, marka bartamaha roobabka Guga la gaaro ee Bisha 5aad, sicirka caanaha ayaa loo badinayaa iney kordhaan ka dib markii xoolaha irmaanka ah ay u guuraan halkii ay daaqi jireen xilliga qoyaanka oo ka fog deegaannada reer-webiga.

- **Sicirka xoolaha** ayaa loo badinayaa inay raacaan caadigoodii isbeddel xilliyeedka. Hoos u dhac ayay ku soconayaan illaa dhammaadka Bisha 2aad ooy ugu wacan tahay hoos u dhaca dalabka xoolaha dhoofka iyo kuwa deegaanka looga baahan yahay, laakiin sicirka xoolaha ayaa kordhi doona si tartiib ah laga billaabo Bisha 3aad illaa Bisha 5aad maadaama ganacsatadu ay billabi doonaan xoolo urursigii bish Ramadaanta ee dhammaadka Bilaha 6aad/7aad.

**Suuqyada iyo ganacsiga:**

- **Sicirrada masaggada iyo galleyda** ayaa loo badinayaa inay dhacaan illaa dhammaadka Bisha 2aad ka dib markii sahay cusub ay soo gaarto suuqyada, inkastoo waxsoosaarka Deyrta ee Bilaha 1aad/2aad uu ka hooseeyay dhexdhexaadkii. Sicirrada masaggada iyo galleyda ayaa loo badinayaa inay kordhaan laga billaabo Bisha 3aad illaa 6aad ka dib markii laga gurto sahayda suuqyada bahida loo qabana ay sii kororto oo yebel baroorkii beeraleydana timaaddo.
- Iibka dalag lacageedka, gaar ahaan sisinta, qooysaska hantiilayaasha iyo kuwa dhexdhexaadka ah ayaa ku kharash gareyn doona iibsiga badarka inta sicirka badarka uu hooseeyo muddada dalag goosiga ka dib si ay suuqyada uga iibsadaan laga billabo Bisha 3aad illaa 6aad, ka dib markii sicirka badarka uu sare u kaco. Tani waxay ganacsatada u oggolaaneysaa ganacsatada inay sii wataan kasoo iibsigoodii illaa Bisha 6aad qooysaskan si ay uga caawiso baahida suuqa.
- Waxsoosaarka badarka ee dhexdhexxadka ka hooseeya, iyo kororka sicirrada lala xiriirinayo ayaa loo badinayaa inuu kordho **kharashka ugu-yar ee dambiisha** muddada yebel boroorka beeralleyda laga billaabo Bisha 4aad illaa Bisha 6aad.
- **Sicirrada agabka dibadda laga keeno** ayaa si waafi loo badinayaa inay degganaadaan illaa Bisha 4aad. Iyagoo raacayaa isbeddel xilliyeedka caadiga ah, sicirrada agabka dibadda laga keeno ay loo badinayaa inay billaabaan wax yaroo koror ah Bisha 5aad ka dib maraakiibta ay yaraato laga billaabo Bisha 5aad illaa 8aad oo ah xilliga dabetllaha mansoonka ay ka dhacaan xeebaha.
- **Heerarka sarrifka lacagaha** ayaa loo badinayaa in sida badan ay kuwo deggan illaa Bisha 6aad.

**Gargaarka bani'aadminimo:**

- Gargaarka bani'aadminimo ayaa loo badinayaa inay ka sii socon doonaan meelaha la gaari karo, ooy ku jiraan koonfurta Soomaaliya.

**Colaadda:**

- Nabadgelyo darrida ayaa weli sii jiri doonta illaa Bisha 6aad. Colaadda ka taagan qabaa'illada Shabeellooyinka ayaa loo badinayaa inay sii jiri doonta, hakad iyo yareynna gelin doonta ganacsiga, shaqo u doonashada, iyo guurguurkii caadiga ahaa ee xoolaha iyo dadka.

- Collaadda u dhexeysa Al-shabaab iyo ciidamada dawladda ooy taageeraan ciidamada Hawlgalka Midowga Africa ee Soomaaliya (AMISOM) ayaa loo badinayaa inay kordhaan inta u dhexeysa hadda iyo Bisha 6aad. Waxaa laga yaabaa niyad jab ku riddo ganacsiga gaar ahaan isu-socodka meelaha kala fog-fog, waxaa kaloona laga yaabaa inay sii xannibaan gaarsiinta gargaarka melaha qaar ee ay colaaddu saameysey.
- Colaaduhu waxaa laga yaabaa in ay ku koobnaadaan muhimmaddooda Muqdisha, gobolldada Shabellaha Hoose iyo Dhexe, Baay, Bakool, Gedo iyo Jubbad Hoose iyo Dhexe.

*Sida loo Badinayo Natiijooyinka Sugnaanta Cuntada*

In lagu qiyaasay 857,000 ruux ayaa ku jiri doona xaalad B'anaan ah ama Gurmad deg-deg ah (IPC Wajiga 3 iyo 4) oo u baahan gargaar bani'aadminimo inta u dhexeysa hadda illaa Bisha 6aad (Jaantuska 2). Tiradan hadda soo baxdey ayaa ka dhigan in 18 boqolkiiba uu hoos u dhacay tan iyo Bishii 1aad 2013, balse wax aad u yar 1.5 boqolkiiba uu hoos u dhacay dadka u baahan gargaar bani'aadminimo oo deg-deg ah tan iyo Bishii 8aad 2013. Inkastoo saameyn wanaagsan tahay kororka sicirka xoolaha, heynta xoolaha, oolitaanka caanah soo hagaagey, sicirka firida dalka iyo cuntada laga keeno dibadda ee hooseeya, marka loo dhigo awoodda wax iibsiga ee ka imaneysa shaqooyinka la qabto iibka xoolaha oo sarreysa, iyo gargaarka bani'aadminimo ee socdey lixdii billod ee dambeysay, qoysas badan ayaa ayaa weli u baahan gargaar. Firida dalka kazoo baxda ayaa loo badinayaa in laga sii heli doono suuqyada, balse ay kasii hooseyn doonto heerkii caadiga ahaa illaa Bisha 6aad uguna wacan tahay waxsoosaarkii Deyrta oo ku dhowaad 20 boqolkiiba ka hooseeyay celceliska 5-sano.

Guud ahaan, natiijada sugnaanta cuntada ee habnololeedyada **xoolodhaqatada** intooda badan loo badinayaa in xilligan qura uu xumaan doono muddada Bisha 1aad illaa Bisha 3aad ee xilliga Jiilaalka, ka dibna waxaa xigi doona isasoo tarkii xilliga Guga markuu billowdo. Roobabka oo la filayo inay billaabmaan waqtigoodii loona badinayo inay noqdaan kuwo ku dhow caadiga, natiijadu waa oolaanshaha baadka iyo doogga iyo biyaha inay ku fillaadaan si aad ah, iyo dhalmo xoolaad oo heer dehxdhexaad ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jiri doona deegaanno yar yar oo gobollad Bartamaha ka mid ah oo dhalmadoodu ay hooseyso. Dhalmadaa xoolaha ayaa si xilliyeed ah kordhin doonta oolaanshaha caanaha loona badinayaa inay ahaadaan heer caadiya illaa Bisha 6aad.

**Deegaanada hab-nololeedyada jiinka webiga iyo beero-xoolo dhaqatada Koonfureed:** Waxa laga yaabaa in sugnaanta cunnadu ay ka sii darto xilliga yabal baroorta ee bilaha 4aad – 6aad. Ha yeeshee, fursadaha tacab goosiga ayaa hagaagaya billawga xilliga *Gu'ga*, taas oo keenaysa/dhalinaysa dhakhli wax lagu gato/iibsado.

Taxanaha inta badan la fisho xilli roobaadka Gu'ga (4aad – 6aad) ka sakow, in ka badan laba malyuun qof ayaa la filayaa inay ku sii jiraan xaalad walaac leh (Marxaladda wajiga 2).Awoodooda ay ku ilaalinayaan hab-nololeedkooda waa wiiqmi doonaa illaa bisha 6aad.Waxa ku adkaan doonta qoysaskan inay helaan ama daboolaan cuntada ugu yare e qoys (6 qof) ku noolaan karo illaa badhtamaha sannadkan (2014), waxayna ku sugnaan doonaan xaalad u nugul dhibaatooyinka keenina karta inay ku sifoobaan xaalad Daran (Marxaladda wajiga IPC 3aad).

Dadka barakacayaasha oo ah 74 boqolkiiba tirada dadka ku dhibban dalka ayaa ku jira xaalad ***Daran*** ama ***Gurmad*** (IPC Wajiga IPC 3 iyo 4).

**Bulshyooyinka xoolodhaqatada, beero-xoolodhaqatada iyo kuwa ku nool jiinka webiga,** oo hadda ku sugan xaalad Ba'an iyo Gurmad (IPC Wajiga 3 iyo 4), ayaa laga yaabaa inay ku sii jiraan xaalad cunno xumaan ah oo lagu sifeeyay inay xaaladdu tahay mid Daran ama Gurma (Marxaladda wajiga IPC 3 iyo 4) ugu yaraan illaa bisha 6aad. Deegaanadan oo ay ku jiraan goobihii ay duufaanadu ku dhufteen ee gobolada Nugaal iyo Bari, goobihii ay fatahaadda ka dhacdey ee diisha webiga ee gobollada Shabeelooyinka iyo Jubooyinka, hab-nololeedka xoolodhaqatada Deexda ee gobolada Dhexe iyo qayb ka mid ah dadka ay abaartu saameeyeen ee gobolada Hiiraan, Jubada Dhexe iyo Gedo. Cunto heliddu way kobci doontaa hab-nololeedka Diil webi ee gobolka Jubada Dhexe taas oo loo aanaynayo wax-soo-saarka ay filanayaa bisha 3aad 2014 iyo shaqooyinka la xidhiidha hawlaha wax-soo-saarkan, hawlaha la xidhiidha u diyaargarawga xilliga *Gu'ga* ee bilaha 3aad/4aad 2014, iyo dhalidda xoolaha oo sahleysa caano helidda bilawga *Gu'ga*. Waxaa laga yaabaa arrimahan oo dhammi inay hagaajiyaan xaaladda sugnaanta cuntada noqon doontana mid walaac ah (IPC Wajiga 2), ka dib marka la goosto wax-soo-saarka bisha 3aad.

Waxa laga yaabaa inay xumaato xaaladda cunnada deegaannada hab-nololeedka beero-xoolodhaqatada degmada Beletweyn ee gobolka Hiiraan xilliga Jilaalka (2aad – 3aad).Quudashada xaddiga cunno ayaa noqon doonta mid aad u xun ama liidata xilliga yabal baroorta ee bilaha 4aad – 6aad, 2014. La'aanta keydka badarka ee heer qoys ayaa keenaysa in suuqa wax laga gato/iibsado, laakiin amaahda isbiirsatay iyo yaraanta dakhliga ayaa qoysaska qaar u baahdeen inay iibiyaan qayb hantidooda ah taasina keeni doonto in deyn bixintu gaabis noqoto. Waxa laga yaabaa in uu deegaankani ku sii jiro xaalad walaac leh (IPC Wajiga 2), laakiin qoysaska qaar ayaa laga yaabaa inay ku sugnaan doonaa xaalad Daran ama Gurmad (IPC Wajiga 3 iyo 4) inta ka horeysa goosashada wax-soo-saarka xilliga *Gu'ga* ee bilaha 2aad – 6aad.

**Hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada Koonfureed ee Jubada Dhexe:** Waxa-soo-saarkii *Deyrtu* aad ayuu uga hooseeyay inta caadiga ah, Roob la'aantii dhacday xilligii *Deyrta*. Roob la'aantani waxay sababtay in kaabayaasha xooluhu hoos u dhacaan.Tirada heysiyada xoolaha way ka hooseeyaan inta halbeega/asaaska u ah xoolaha ee heer qoys. Hadda qoysasku waxay gadayaan/ iibinayaaa xoolo ka badan intii ay iibin jireen si ay u daboolaan baahidooda cunto. Xaaladda xooluhu sida jidhka iyo qiimuhuba ayaa laga yaabaa inay ka sii daraan oo ay hoos u dhacaan xilliga kulul ee *Jiilaalka* bilaha 1aad – 3aad. Deynta ee heer qoys ayaa aad u sarreeya. Qoysaska danyarta ah ayaa heli doona qadar caano ah marka ay dhalaan qayb ka mid ah xoolahoodu. La'aakiin, waxa laga yaabaa inay sicirka xooluhu noqon waayaan qiime waafiya inta ka horeysa bisha Ramadaan ee la urursanayo xoolaha bilaha 4aad - 5aad. Qoysasku waxay ku jiri doonaan xaalad Daran (IPC Wajiga 3) illaa bisha 6aad ama laga gaadhayo goynta wax-soo-saarka xilliga *Gu'ga*.

*Deegaanada Magaalooyinka (Reer Magaalka)*

Dadka ku nool magaalooyinka waxa loo aanaynayaa inay ku jiraan/sugnaadaan xaalad Walaac leh (IPC Wajiga 2) inta u dhexaysa bilaha 2aad – 6aad, inkastoo la saadaaliyey in qiimaha badarku wax yar ayuu sare u kici doonaa. Waxa laga yaabaa in sare u kacan qiimaha badarka ee la filanayo uu aad saameyn weyn ku yeesho awood iibsiga qoysaska danyarta ah. Tusaha qiimaha adeegtaha ayaa la filayaa in uu hoos u dhaco illaa bisha 3aad, sababta oo ah hoos u dhaca ku yimid qiimaha masagada wax-soo-saarkii Deyrta ka dib iyo waliba nagaanshaha ama hoos u dhaca qiimaha ascaarta la soo dejiyo sida ku xusan kharashka maciishadda aasaasiga ah; laakiin waxa laga yaabaa inay mar labaad kor u kacdo maadaam xilliga yabal baroorta ay badanneyso badar iibsigu. In isha lagu hayo/loo kuur galo qiimaha ascaarta. Marka laga yimaado qiimaha ascaarta, fursado dhaqaale oo si yar u kobcaya oo ka jira magaalooyinka ayaa la filayaa in uu ka dhigo mushahar maalimeedka tacabgoosi mid nagi inta badan deegaanada magaalooyinka. Hayeeshee, colaadda ayaa la filayaa inay noqoto caqabadda ugu weyn ee qoysaska reermagaalku cunnada ku helilahaayeen, gaar ahaan gobolada Koonfurta iyo Bartamaha taas oo qoysaskii barakacay ka g'odoomeen suuqyadii muhiimka ahaa si ay uga xoogsadaan. Colaadan joogtada ah oo saameyn ku yeelatay nolosha reer magaalka ayaa laga yaabaa inay sii kordhiso kharashka la galyo iyo dhibaatooyinka la wajahayo taas oo ay wehilso hawlaha ganacsiga iyo dhaqdhaqaaqa suuqyada. Barakacu waxa kale oo uu sii kordhinayaa ku tartanka fursadaha shaqo helidda, maadaama barakacayaashu ay isku fursado yihiin danyarta reer magaalka ah.

*Deegaanada Barakacayaasha*

Tiiyoo la xiganayo inta badan malmalaynta la qaatay, dhammaan dadka barakacayaasha ee Muqdisho waxa lagu qeexay inay ku sugan yihiin xaalad Daran (IPC Wajiga 3). Bishii 1aad, afar daloolow sadex barakacayaasha Muqdisho waxay ku jireen xaalad Walaac (IPC Wajiga 2), sababta oo ah gargaarka iyo kaalmada ku qulqulaya dadka barakacayaasha ah. Hayeeshee, fursadda dadka barakacayaasha Muqdisho u leeyihiin gargaar iyo kaalmada ayaa la filayaa inay khatar ku jirto, waxa kaloo laga yaabaa inay jirto hubaal la'aan heerka iyo xadiga gargaarka yaal. Dawladdu waxay leedahay qorshe ay kaga saareysa dadka barakacayaasha goobaha dawladda sida Muqdisho, Kismaayo, iyo magaalooyinka kale oo Koonfurta ama gobolada Dhexe ah. Barakacan labaad waxay khalkhal gelinaysaa dadka barakacayaasha ah siday u qabsan lahaayeen suuqyada oo ay u xoogsi tagaan dhaqaalana uga sameyn lahaayeen. Waxa kaloo laga yaabaa inay nabad galyadu sii xumaato, barakacuna sii bato. Dadka barakacayaasha waxay u nugul yihiin dhawr dhibato sida cudurada la kala qaado, cudurada laga qaado fayo dhawr la'aanta meel isku raran ahaan loo degan yahay, dhac/tuugo, hooy la'aan oo sababysa dhaxan, kulayl iyo roob celin la'aan. Haddaba, dhammaan 635,000 ruux ee barakacayaasha ah ee ku sugan deegaannada daraasadda laga sameeyay waxay ku jiraan xaalad Ba'an ama Gurmad (IPC Wajiga 3 iyo4) inta u dhexaysa bilaha 2aad – 6aad.

*Odoroska Xaaladda Nafaqo illaa bisha 4aad*

Natiijooyinku waxay tibaaxayaan heerarka nafao darida Ba'ani in ay ka jiraan qaybo badan oo Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya ah iyo Barakacayaasha, nafaqo darridaas oo ka sareysa 15 boqolkiiba ee heerka GAM. Nafaqo daraasadeedyadan la qabtay bilihii 6aad iyo 7aad 2013 waxay muujiyeen qiyaas ahaan in ka badan 206,000 caruurta da'doodu ka yar tahay shan sano ay yihiin qaar nafaqadoodu xun tahay. Tani waxay waxyar ka hooseysaa qiyaasta tiradii bishii 12aad, 2012 oo ahayd 215,000. Tiradani waxa ku jira qiyaas 40,950 caruur Soomaaliyeed oo ka yar shan sano oo ku suagn xaalad nafaqo darro oo aad u ba'an (SAM). Saddexdii carruur ah laba ayaac ku sugan xaaladda nafaqodarri waxayna ku nool yihiin Koonfurta Soomaaliya. Natiijooyinka sahamadani waxay muujinayaan inay cuduradu yihiin qodobka ugu weyn ee sababa heerarka nafaqo darida Ba'an ee gobolada Dhexe iyo Koonfurta Soomaaliya iyo waliba xeryaha barakacayaasha.

Odoroska xaaladda nafaqo ee bilaha 2aad – 6aad waxay ka tarjumayaan qiyaasaha hadda ee nafaqada, taxanaha nafaqo ee xilliyada, taxane taariikheedka cudurrada iyo saadaalinta sugnaanta cuntada ee bilaha 2aad – 6aad. Guud ahaan, xaaladda hadda jirta ee nafaqada waxa la filayaa inay ahaato mid aan isbeddelin dalka oo dhan (Jaantuska 7). Hayeeshee, kuwan nagi waxa ka duwan kuwan:

- **Hab-nololeeyada beero-xoolo dhaqatada W. Galbeed, xoolodhaqatada Sool ee gobolada Sanaag iyo Sool:** Xaaladda nafaqo waxay ka sii dartay waxayna noqotay xaalad *Ba'an*. Tan waxa u sabab ah hoos u dhacay ku yimid wax-soo-saarka beeraha oo saameyn ku yeehsay kedka badarka ama firida.
- Xaalad nafaqo ***Daran*** ayaa laga saadaaliyay hab-nololeedka beero-xoolo dhaqata gobolka Bakool iyo hab-nololeedka jiinka webiga gobolka Shabeelaha Hoose. Koonfurta gobolka Hiiraan iyo hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada Shabeelaha Hoose ayaa xaaladda nafaqo ahaan doontaa mid ***Ba'an*** taas oo lagu saleynayo taxanaha xilliyeedka nafaqo iyo sida ay yihiin kuwa hab-nololeedyada deriska. Daraasad nafaqeed lagama qaban goboladan bishii 12aad.

Soomaaliya waa dalka ay ka jirto nafaqo darro aad u sareysaa. Inkastoo dhimashadu ay hooseyso, heerarka nafaqodarida (GAM) waxay yihiin inta u dhexaysa ***Ba'naan - Daran***. Cudurradu aad ayay u badan yihiin una sareeyaan, waxana jira hadda koror dhimasho iyo nafaqo darri aad ba'an (SAM).

**MEELAHA UU DHIBKA KA JIRO**


**Habnololeedka diil-webi ee Gobollada Jubbada Dhexe iyo Shabeelaha Dhexe**

*Xaaladda Maanta*

**Roobabkii Deyrta ee bilihii 10aad illaa 12aad** ayaa kala duwanaa, laakiin halka ay wabiyada kasoo farcamaan ee Itoobiya, roobabka wey xoogganaayeen. In ka badan 10,000 hektar (ha) oo dhul beereed ah oo deegaannada webiyada Jubbada Dhexe ah iyo in ka badan 8,000 hektar (ha) oo dhul-beereedka degmooyinka Jawhar iyo Balcad ayey waxyeeleeyeen. Fatahaaduhu waxeyna ka barakiciyeen 1,100 qoys tuulooyinkoodii Lebiga, Xansholey, Dhay, and Bulo Waso ee degmooyinka Jowhar iyo Balcad.

- **Xoogsiga Beeraha iyo Qaabka Dalagga:** Daadadku waxay sababeen helitaan xaddidan ee xoogsiga beeraha. Tani waxay yareeysay daqligii qoysaska. Qoysaska heli karey shaqo, daqligii tacab goosiga ayaa hoos u dhacay si ka gedisan xilliga. Waxay hoos u dhacday 33 boqolkiiba laga bilaabo bisha 10aad illaa 12aad degmada Jilib ee jubada dhexe iyo iyagoo hoos uga dhacay 38 boqolkiiba maka loo eego sanadkii hore degmada Jowhar ee Shabeellaha Dhexe.

**Jaantuska 7. Qiyaasta nafaqada, Bilaha 2aad ilaa 4aad ee 2014**




- **Qiimaha Bedeecooyinka**: **Qiimaha Galleyda Cad** ayaa kordhey 31 boqolkiiba laga billaabo bisha 10 aad illaa 11 aad degmada Jowhar ee Shabeellada Dhexe. Kororka qiimaha ayaa lala xiriirinayaa Bakaarihii keyka oo qoyey/lumay daadaka dartood iyo hoos u dhac ku yimid xiriirkii ganacsi ee meelaha kale ee Galleyda laga soo saaro sababo la xiriira isgarsiinta jidadka oo xumaatey, nabad gelyo xumo iyo isu socoka ganacsi oo koobnaa. Jilib, Qiimaha galleyda cad ayaa kordhay 29 boqolkiiba. **Qiimaha Badeecooyinka dibadda ka yimaada** ayaa ahaa sidoo kale kuwo kordhaya Shabeellada Dhexe inkastoo aanay u kordheynin si la mid ah sida aay u kordhayeen jubada Dhexe, taasoo loo badinayo ganacsatada oo ka heshay bedeecadda dibadda ka immaaneysa dekadda Kismaayo. Sababo la xiriirinayo, qiimaha galleyda cad oo kor kacay iyo daqliga xoogsiga oo hoos u dhacay, ku iibsashada daqliga xoogsiga Galleyda cad hoos ayuu u dhacay.

- **Heerka Deynta:** Heerka deynta ee qoysaska danyarta ah ee webiga jiinkiisa ayaa kordhay iyadoo qoysasku ay sii kordheyso deyn ku qaadashada cuntada.

- **Helitaanka Caanaha:** Ayaa xilli ahaan hooseeya iyadoo xoolihii ay ka fogaadeen/guureen aagga webiga, tageenna dhulkii aay daaqi jireen xilliga roobka. Oolista caanaha ee suuqa ayaa hooseeysa, iyo qiimahooda oo xoog u kordhay laga soo bilaabo billowgii fatahaadda.

- **Nabadgelyo Darrida iyo Dagaalada:**

  - **Shabeellaha Dhexe**, Dagaalladu waxay sababeen, barakac, hanti lumis, tasoo u sii horseeday wax soo saarka beeraha oo aad hoos ugu dhacay. Dagaalladii qabaa'ilka ee degmada Jowhar ee bartmaha bishii 11aad ayaa sababey dhimasho dad iyo lumis hanti iyo taasoo keentay barakac dheeraad ah oo lagu qiyaasay 5,000 qoyska ee reer webiga iyo Beer-xoolodhaqtada. In badan oo ka mid ah barakacayaasha colaaddu keentay ama daadaku sababeen ayaa ka tagay dhul beereedkoodii oo aan beerneyn xilligan. Tirada badan ee jid-gooyooyinka ayaa kordhiyey qiimaha safrinta badeecada iyadoo taasi aay kordhineyso qiimaha badeecadda.

  - **Jubbada Dhexe**, iska hor imaadyo hubeysan una dhexeeya Ciidamada iyo kooxaha hubeysan, sahanka hawada iyo duqeynta diyaaradaha ayaa wax yeeleeyey caadinnimadii ganacsiga iyo guurgurka xoolaha iyo qaabka doonashada shaqada. Tirada badan ee jid-gooyooyinka ayaa kordhiyey qiimaha safrinta badeecada iyadoo taasi aay u gudbeysa qiimaha badeecada.

- **Kaalmada Bani aaddannimo**: Helitaan cuntada kaalmada ah iyo Mashaariicda kale ee badbaadineed ayaa ahaa kuwo ku yar gobolladan

*Natiijada Sugnaanta Cuntada*

- **Jubbada Dhexe,** In kastoo xaaladda shaqadu xuntahay, xataa qoysaska danyarta ah waxay sida caadiga leeyihiin ari. Carqaladda ganacsiga waxay aheyd mid ka waxyeello yar marka loo eego Shabeellaha Dhexe. Sido kale, beerista beeraha dhlka ay biyuhu ka laabteen ayaa billawdey. Dadka reer-webiga ee Jubada Dhexe ayaa sugnantooda cunto lagu qiimeeyey heerka ***Dhibbanaanta*** ee ***(IPC Wajiga 3)*** bisha 1 aad ee sanadka 2014

**Shabeellaha Dhexe,** sababo la xiriira lumidda baaxadda leh ee hantida iyo heerka barakicidda oo aad u sarreeysa, qoysaku waxay leeyihiin kala doorasho yar intaan ka aheyn deyn aay cunto ku iibsadaan. Danyarta halkan, sida caadiga ah may laha ari. Iyada oo uu yar yahay haddiiba aay jiraan wax xoolo ah oo la iibiyo iyo awoodda adkeysiga oo kooban, qoysaska danyarta ah ayaa wajahaya cunto yari aad u ballaaran oo lagu qiimeeyey heerka ***Ba'naanta*** sugnanata cuntada ee ***(IPC Wajiga 3)*** marka kaalmada bani-aadminimo lagu daro hase yeeshee, marka laga reebo kaalmada bani-aadminimo, deegaannada reer-webiga waxay u badantahay inuu sii xumaado ayna gaaraan heerka ***Gurmadka deg-degga ah (IPC Wajiga 4)***

**Malamaleyn**

Marka lagu daro heerka malamaleynta waddanka ee kor lagaga Hadley, oddorosidda ugu suurto galsan ee hab-nololeedka Diil webi ee gobollada Jubada Dhexe iyo Shabeellaha Dhexe illaa laga gaarayo bisha 6aad ee 2014 waxay ku saleysan tahay malamaleynta dheeriga ah ee soo socota:

- **Shabeellaha dhexe**, biyaha fatahay dhammaantood dib u laaban maayaan illaa bisha 3aad. Sidaa darteed, suurto gal ma noqon doono beerashada dhul aay biyo ka laabteen

- Tiro ku dhaw 5,000 oo **qoysaska barakacayaasha** ah oo haatan ku nool xerada Ciidamada Midowga Afrika ee Somalia (AMISOM) ee Jowhar ayaan ku laaban doonin deegaannadoodii xilligan

- **Jubbada Dhexe**, beerashada dhulka aay biyaha ka laabteen hore ayuu u billowday. Qiyaas ku dhaw dhexdhexaad ee goosashada dalagga xilli-dhaafka ayey u badan tahay iney bilaabato bisha 3 aad.

- **Jubbada Dhexe, qiimaha firileyda dalka** ayaa loo badinayaa inuu billaabo hoos u dhac dhammaadka bisha 2 aad iyadoo cunitaanka xabuuqa galleyda ee dalagga xilli-dhaafka ah ee Deyrta ka billaabanayo beerihii aay biyuhu ka laabteen

- **Shabeellah dhexe, Qiimaha firileyda dalaka**, ayaa loo badinayaa inuu muujiyo qaab hoos u dhac marka galleyda ka imaaneysa Shabeellaha hoose ay soo gaarto suuqyada bisha 3aad. Si kastaba ha ahaatee, hoos u dhacaa waxaa qarin doona qiimaha sare ee keenidda oo joogto noqon doona tasoo la xiriirta nabad gelyodarrida gobolka.

- Helitaanka shaqada beeraha ayaa loo badinayaa iney korodho inta u dhaxeysa bilaha 3 aad iyo 6 aad, Jiinka webiga ee Shabeellaha Dhexe iyo Jubbada Dhexe labadaba, sidaa darted daqliga lacagta ayaa loo badinayaa inuu kordho inta lagu jiro qeybta labaad ee oddorosidda.

***Sida loo badinayo in xaaladda sugnaanta cuntada ay noqon doonto***

**Habnololeedka Diil Webi ee Gobolka Shabeellaha Dhexe,** ku daahida biyaha fatahaadda dhulka la beerto waxaay u badantahay iney keento inaanu jiri doonin dhul ay biyuhu ka laabteen oo la beerto iyo filashada dalag xilli-dhaaf ah oo la goosto inta u dhexeysa bilaha 2aad iyo 4aad. Tasoo aay wehliso keyd la'aanta qoysaska iyo helitaanka shaqada oo yar, aayna bar-bar socoto qiimaha oo sareeyo. Qoysaka danyarta ah waxay ku sugnaan doonaan xaalad cunto yari oo aan ku filleyn iyo iyagoo ku nagaan doona heerka ***Ba'naanta*** sugnaanta cuntada ee ***(IPC Wajiga 3)*** inkastoo laga yaabo in qaybo ka mid ah ay sii helaan kaalmo bani'aadminimo oo lagu daray falanqeynta. Si kastaba ha ahaatee, qoysaka saboolka ah waxaay u badan tahay iney ku dhacaan xaaladda sugnaanta cuntada ee ***Gurmadka Deg-degga ah*** **(IPC Wajiga 4)** haddii aaney helin kaalmo bani'aaddminimo illaa laga gaarayo bisha 6aad, inkastoo aay heleyaan shaqooyindheeri ah marka beerashada Guga ay billaabato bisha 4aad.

Hab nololeed Diil webi, Beer-xoolodhaqtatada koonfured ee Jubada dhexe, helitaanka cuntada ayaa ahaa doona qiyaastii mid liita bisha 2aad heerka ***Ba'naanta*** **(IPC Wajiga 3)** iyadoo sicirka firida uu sareeyo helidda shaqadana ay yartahay oo xadideysa quudashada. Inkastoo qoysaska loo badinayo iney ku sii dambeynayaan heerka ***Ba'naanta*** **(IPC Wajiga 3)** illaa bisha 6aad, quudashada cuntada iyo helitaankeeda ayaa si tartiib ah usoo hagaagi doona, kana bilaabanaysa cunitaanka xabuuqa galleyda ah dabayaaqada bisha 2aad, iyo iyagoo ka dib goosan doona dalagga xilli-dhaafka ah ee Deyrta oo bisil bilaha 3aad/ 4aad, iyo iyadoo loo badinayo in roobabka xilliga Guga oo ku dhaw caadi ee billowdaan ooy ka helaan shaqo dheeri ah laga billaabo bisha 3aad illaa 6aad.

**Deegaannada ay duufaantu waxyeeleysay ee Habnololeedyada Oogada Sool iyo Xoolodhaqatada Deexda ee Waqooyi Bari**

Xaaladda Haatan taagan

Waxaa roobab xoog badan oo dabaylo wata ka da'een degmada Dangorayo ee Gobolka Nugal, dhulka soolka degmadda Banderbayla ee gobolka Bari iyo reer miyiga dhul xeebeedka degmada Eyl ee Gobolka Nugaal 10 – 12kii bishii Nofeember, duufaantaas oo loo bixiyey duufaanta 3aad ee Kulaylaha "tropical cyclone three" Daadad iyo dabaylo xoogaan oo ay roobabkani keeneen ayaa waxay sababeen in dad ku dhinto, hanti badanna ku burburto, iyadoo xoola farabadani ku dhinteen, doonyo badan oo kaluumaysina waxna burbureen waxna khasaare soo gaaray, waxay kaloo roobabku khasaaro u geysteen isgaarsintii iyo wadooyinkii, iyadoo ay go'een wadooyinkii xeebaha galayey.

Dufaantu waxay saameysay Habnololeedyada xoolodhaqatada iyo kuwa ku tiirsan kallumeysiga ee uu yahay ishooda dhaqaale ee ugu muhiimsan. Qaysaskii ku waayey xoolahoodii intoodii badneyd ayaa sida badan cuntadooda ku helaan kaalmada banii'aadminimo iyo taageerrada eheladooda. Xoolhii dhammaade waxey aad u yareeyeen helitaanka caanaha ee qooysaska danyarta halka qalabkii kalluumeysiga ee lumay ay yareeyeen helitaanka, cunistii iyo ku tiirsanaantii kalluunka. Waxaa kaloo jira in qiyaastii ku dhowaad 65% arigii ay duufaantu leysay, taas oo aad u yareeysay tiradda arriga iibsami kara. Wax yeelooyinkii soo gaarey wadooyinka ayaa waxay iyaguna saameeyeen helitaanka biyo nadiif ah, sicirka cuntada iyo alaabooyinka kale ee muhiimka ah ayaa siyaadey ka dib markii wadooyinkii go'ay ay saameeyeen ganacsiga. Xilagan ilaha dakhliga ee qoysaskii duufaantu saamaysay way xadidan yihiin, tirada xoolaha ay haystaana aad yay hoos ugu dhacday, shaqooyin yar-yar ayaa mar mar la helaa oo xoogsi ah, waxaana kaloo jira dad iibiya xaabada iyo wax yaabaha la midka ah ee duurka laga keeno, taas oo ina tusaysa in dakhligoodu aad u kooban yahay, marka laga yimaado kaalmada qaraabada, taageerada ka timid qaybaha kale ee dalka iyo kaalmada banii'aadminimo, kuwaas oo aad u siyaaday ilaa intii duufaantu dhacday, qoysaska danyarta ahi waxay hadda helaan raashin ku salaysan qoys qoys, sidoo kale cunto ayay soo deyn-qaataan, iyadoo daynta lagu leeyahay ay siyaadey 50%, dayn qaadashadda qoysaska qaarkoodna ay xadidantey hadda.

Qoysaska danyarta ahi waxay hadda ku jiraan xaaladda sugnaanta cunto heerka Ba'naanta (IPC Wajiga 3!), waase marka la sii wado kaalmada bani'aadminimo, inkastoo raashinka loo qoondeeyey ay yar yihiin, hadday joogsato kaamadaasi dadka danyarta ahi waxay u badan tahay inay galaan xaalad Gurmad deg-deg ah (IPC Wajiga 4)

*Malamaleyn*

- Caafimaadka xoolaha oo liita iyo tiraddii xoolaha oo aad u hooseysa awgeed, qoysaska danyarta ahi ma gadi karayaan xoolahooda. Dakhligii laga heli jirey xoolaha xiliyadda aadka loo gato bilaha 4aad iyo 5aad si loo isticmaalo ramadaanka ayaa sidii hore si weyn uga yaraan doona

- Gaaritaanka suuqu sidiisii hore ayuu ku soo noqday, waxaana la rajeynayaa inuu sii socdo oo laga helo cuntooyinka noocyadooda kala duwan

- Wax soo saarka kalluunka waxay u badan tahay inuusan sii socon doonin xiligaan ilaa bisha Juun, maadaama aan la dayac tiring/la bedelin doonyihii iyo qalabkii ku waxyeeloobay duufaanta iyo iyadoo ay bilaabanayaan dabaylaha Maansuunka laga bilaabo bisha 5aad, taas oo aan dhiirigelinayn in dib loogu noqdo badda.

- Inkastoo gargaarka banii'aadminimo ee baaxadda lihi la rajeynayo inuu sii socdo, haddana waxaa la qiyaasayaa inaysan kaalmadaasi sii siyaadi doonin xilligan ilaa 6aad.

*Qiyaasta Natiijadda Sugnaanta Cuntadda*

Xiligaan ilaa bisha 6aad sida badan dadka danyarta ahi ma heli karayaan caano ama dakhli ka soo gala xagga xoolaha. Sicirka cuntooyinka daruuriga ah sida bariiska waxay u badan tahay inay siyaadaan sidii horayba loo arki jirey xiliyadda bad xiranka ah. Taas waxay aad u sii yaraynaysaa awoodda wax iibsiga ee danyarta. Kalluumaysiga iyo dakhliga laga helana uma eka kuwo siyaadaya xiligaan ilaa bisha 6aad, halka heerka dayntu ay u egtahay inuu sii siyaadi doono qoysas badanna ay dhici karto in deynta loo diido hadda ilaa bisha 6aad. Waayitaanka biyo nadiif ah iyo fayadhowr waxay keeni kartaa dhibaato caafimaad iyo in ay siyaadaan cuduradda biyaha ka dhasha xiliyada April ilaa Juun ee roobabka Gu'ga, taas oo sii siyaadin karta heerka bukaanshaha caruurta.

Qaysaska danyarta ahi waxay u muuqataa inay ku sii jiri doonaan xalad oo cunto yari oo Ba'naan ah (IPC Wajiga 3), waa haddii gargaarka banii'aadanimo sii socdo. Haddiise gargaarkaasi joogsado, waxay u muuqataa in ay ku dhacayaan xaalad u Gurmad deg-deg ah (IPC Wajiga 4).

**Dhacdooyinka Beddeli kara Saadaasha**

**Shaxda 1: Dhacdooyinka ay suurtowdo in ay wax ka bedelaan saadaasha Lixda bilood ee soo socota**

| Goobta | Dhacdada | Saamaynta ay ku yeelan karto Sugnaanta Cuntadda |
|---|---|---|
| Habnololeedyada Beera-xooldhaqatada iyo Diil-webi ee Soomaaliya | Roobabka Gu'ga ee Bisha 4aad ilaa 6aad oo ka hooseeya intii caadiga ahayd ama ka liita baahsananaantooda iyo muddada di'itaank roobabka Guga | Xilli roobaadka oo xumaadaa wuxuu saamayn ku yeelan karaa kasoo kabashada laga rajeynayey xaaladda sugnaanta cuntadda. Dhulka intiisa badan qalleyl iyo biyo la'aantu waxay si weyn hoos u dhigi kartaa hawlaha beeraha iyo wax soosaarkooda. Waxaa dhulka beer-xoolodhaqatada hoos u dhacaaya helitaanka biyaha, waxaa kaloo hoos u dhacaaya helitaanka cuntadda iyo dakhligooda, waxaana siyaadaya dadka dan yarta ah ee gelaya xaalad cunto yari oo Ba'an (IPC Wajiga 3) |
| Dhulkii Duufaantu Saamaysay | Gargaarka bani'aadminimo oo la joojiyo ama la yareeyo | Joojin ama in aad loo dhimo gargaarka bani'aadaminimo waxay u badan tahay in ay aad u saamaynayso kordhisana faraqa cunto yarida, taas oo qoysas badan u keenaysa inay galaan heer u baahan Gargaar deg-deg ah (IPC Wajiga 4). Nafaqodarrida ayaa loo badinayaa inay siyaado, dhimasho carruur iyo qaybaha bulshada ee nugul oo dhici doona. |

KU SAABSAN DIYAARINTA SAADAASHA

Si loo odoroso natiijada sugnaanta cuntada, FEWS-NET waxay diyaarisaa tiro malooyin ah oo dhici kara, saamayntooda, iyo sida ay ula tacaali karayaan cidda ku hawlan. FEWS-NET waxay falanqaysaa oddoroshaasi iyadoo la eegayo xaaladda markaasi taagan iyo habnololeedada deegaanka si loo gaaro dhacdada loo badinayo lixda bilood ee soo socota. Halkan ka kororso aqoontaada

FEWS –NET waa hawl ay USAID maalgeliso. Xogta warbixintaani ay xambaarsan tahay muhiim ma aha inay ka tarjunto aragtida Midowga Dawladaha Hayadda Hormarinta Caalamiga ama Xukuumadda Midowga Dawladaha.

FSNAU waa mashruuc ay taageeraan deeq bixiyayaal badan waxaana maamusha Hayadda Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobey (FAO)